



**JAMHUURIYADA SOMALILAND**  
**WASAARADA SHAQO-GELINTA,**  
**ARRIMAHA BULSHADA & QOYSKA**

**QABYO-QORAALKA XEERKA**  
**ILAALINTA XUQUUQDA DADKA**  
**NAAFADA AH**

**2021**

**CUTUBKA 1<sup>AAD</sup>**  
**MABAADI'IDA GUUD**

**Qodobka 1<sup>aad</sup>:**

**Magaca Xeerka**

Xeerkan waxa loogu yeedhaya Xeerka Ilaalinta Xuquuqda Dadka Naafada ah – 00/2021.

**Qodobka 2<sup>aad</sup>:**

**Erey-bixin**

**Naafo:** Waxa loola jeeda qof kasta oo si joogto ah u waaya laxaadkiisa, sida Lugaha, Gacmaha, Indhaha, Dhagaha iyo Maskaxda, ama ay gabaan shaqada.

**Qalabka Naafada:** Waxa loo la jeeda qalabka socodka ka caawiya dadka naafada ah, sida baskeeladaha, biraha, qoryaha, lugaha/gacmaha samayska ah, ka caawiya maqalka sida sameecadaha, ka caawiya araga sida ulaha {(Usha Cad), iyo qalabka teknoolajiyada ee ka caawiya dadka araga naafada ka ah qoraalkaiyo akriska} IWM

**Adeegsiga Dhismayaasha :** Waxa loola jeedaa u samayinta kabado ku haboon oo loogu talo galay dadka naafada ahi inay isticmaali karaan, dhamaan xafiisyada dawlada iyo kuwa adeega bixiya.

**Kaabadaha:** Waxa loola jeeda kabadaha u fududeynaya dadka naafada aha galitaanka dhismayaasha.

**Takoor:** Waxa loola jeedaa in loola dhaqmo si ka duwan dad kale iyado lagu faquuqo naafanimadiisa/deeda.

**Xuquuda dadka naafada ah:** Waxa loola jeedaa xaq ay dadka naafada ahi u leeyahay in loo dhawro sharaftooda gaarka ah & ku noolaanshaha nolol hufan oo leh fursado loo siman yahay, si ay u helaan xaquuqdooda madani, siyaasadeed, bulsho & dhaqan-dhaqaale si aan takoor lahayn.

**Xuquuqda asaasiga ah:** Waxaa loola jeedaa xuquuqda aasaasiga ah ee Dastuurka qaranku u damaanad qaaday dadka naafada ah.

**Noocyada Naafada:** Waxa loola jeeda qaybaha ay ka koobantahay naafadu, sida naafada jidhka, araga, maqalka, hadalka & maskaxda

**Caqabadaha:** Waxa loola jeedaa dhibaatooyinka ay la kulmaan dadka naafada ahi sida, takoorka, deegaanka, dhismayaasha, shuruucda, siyaadaha, IWM.

**Dib-uhabayin (Rehabilitation):** Waxa loola jeeda dadaallada kala duwan ee dhinacyada caafimaadka, waxbarashada, tababarka xirfadaha, cilmi-nafsiga, wacyigelinta bulshada iyo shaqada ee qofka naafada ah si uu u awoodo inuu ka qayb qaato nolosha caadiga ah.

**Guddida:** Waxa loola jeedaa Guddida u xilsaaran arrimaha naafada, si xeerkan waafaqsan.

**Guddiga Xulista:** Waxa loola jeedaa guddiga u xilsaaran xulista xubnaha Guddida naafada, si xeerkan waafaqsan.

**Gudoomiyaha:** Waxaa loola jeedaa Guddoomiyaha Guddida Naafada Qaranka JSL.

**Xubnaha Guddida:** Waxa loola jeedaa xubnaha uu ka kooban yihiin Guddida Naafada Qaranku.

**Agaasimaha Fulinta:** Agaasimaha Fulinta waxa loola jeeda waa masuulka ugu sareeya xafiiska Naafada Qaranka marka laga yimaado Xubnaha Guddida Naafada Qaranka.

**W arbixin -sanadeedka:** Waxa loola jeedaa warbixin sanadeedka Komishanku sanadkiiba mar u gudbiyo Madaxwaynaha JSL & Baarlamaanka.

**Baarlamaanka:** Waxaa loola jeedaa labada Gole ee xeer dejinta dalka (Guurtida iyo Wakiilada).

**Urur Naafu:** Waxa loola jeedaa Urur ay samaysteen tiro dad oo naafu ahi, kaasi oo u adeegaya baahiyaadkooda isla markaana ka haysta ogolaansho sharci hay'adaha ku shaqada leh.

**Qodobka 3<sup>aad</sup>:**

#### **FASIRAADA XEERKA**

Xeerkan waxaa loo fasirayaa si waafaqsan shareecada Islaamka, xeerarka kale ee dalka, dhaqanka suuban & heshiisyada caalamiga ah ee xuquuqal aadamaha, gaar ahaan heshiiska caalamiga ah ee dadka naafada ah.

**Qodobka 4<sup>aad</sup>:**

#### **XADKA ADEEGSIGA XEERKA**

1. Xeerkan waxa lagu dhaqayaa dhamaan dadka naafada ah noocyadooda kala duwan ee ku nool dalkan JSL.
2. Xeerka waxa lagu dabaqayaa dhamaan xuduudaha dalkan JSL uu ka kooban yahay si waafaqsan dastuurka.

## **Qodobka 5<sup>aad</sup>:**

### **UJEEDADDA XEERKA**

Ujeedooyinka xeerkan waxa ka mid ah:

1. In lagu xaqiijiyo xuquuqaha aasaasiga ah ee dadka naafada ah, si waafaqsan dastuurka & xeerarka kale ee dalka.
2. In lagu cidhibtiro takoorka & caqabadaha ka dhanka ah dadka naafada ah.
3. In lagu horumariyo duruufaha & xaalada nololeed ee ku gedaaman dadka naafada ah.
4. In lagu tayeeyo adeegyada & heerarka baahiyaha aasaasiga ah ee dadka naafada ah.

### **CUTUBKA 2<sup>AAD</sup>**

#### **XUQUUQDA & XORIYAADKA AASAASIGA AH**

## **Qodobka 7<sup>aad</sup>:**

### **XAQA NOLOSHA, XORIYADA, NABAD-GELYADA JIDHEED & XURMAYNTA MAGAC-SAMIDA**

1. Waxa reeban in qofka naafada ah xoriyadiisa looga qaado si aan waafaqsanayn mabaadi'ida dasuurka & xeerarka dalka.
2. Qof kasta oo naafo ahi waxa uu xaq u leeyahay inuu noolaado, waxaana reeban fal kasta oo lagu waxyeelaynayo jidh ahaan iyo maskax ahaanba.
3. Qof kasta oo naafo ahi wuxuu xaq u leeyahay in la dhawro sharaftiisa, sumcadiisa iyo noloshiisa gaar ahaaneed.

## **Qodobka 8<sup>aad</sup>:**

### **XAQA DACWADA & IS-DIFAACA**

1. Qof kasta oo naafo ah oo la kulma xad-gudub shakhsi oo ku salaysan naafonimo, nololeed, dhaqaale, siyaasadeed ama dhaqan, wuxuu xaq u leeyahay in helo nidaam cadaaladeed oo sugan, kaas loo damaanad qaaday dhamaan shuruudaha cadaadalada.
2. Dawladu waxa ku waajib ah in ay qaada talaabo kasta oo ay ku damanad qaadayso, sidii ay dadka naafada ahi u heli lahayeen kaalmo sharco oo lacag la'aan ah & in laga dhaafo kharshka dacwada.

## **Qodobka 9<sup>aad</sup>:**

### **XUQUUQDA HELIDA ADEEGYADA CADAALADEED & KAALMO SHARCI**

1. Dawladda waxa ku waajib ah in ay dadka naafada ah siiso kaalmo sharci oo lacag la'aan ah, oo ay ku jiraan turjumaannada luqada dadka maqalka ka naafada ah iyo qareeno u dooda si ay u helaan nidaamka caddaaladda sugan.
2. Hay'adaha Garsoorka, Xeer ilaalinta, Booliska iyo Asluubta waxa ku waajib ah in ay u sameeyaan dadka naafada ah dhamaan waxyaabaha u sahlaya in ay si fudud u adeegsan karaan dhamaan dhismayaasha Xafiisyada Maxkamdaha, Xafiisyada Xeer Illaalinta, Saldhigyada Booliska & Xabsiyada.

## **Qodobka 10<sup>aad</sup>:**

### **XAQA KA QAYB QAADASHADA SIYAASADA.**

1. Qof kasta oo naafo ahi wuxuu xaq u leeyahay inuu u tartamo jago kasta oo siyaasadeed oo dalka ah.
2. Hay'adaha dalka ee u xilsaaran arrimaha doorashooyinka waxa ku waajib ah xaqiijinta in ay dhamaan goobaha codbixintu noqdaan, kuwo leh adeegyada/kaabayaasha u sahlaya in dadka naafada ahi ay codkooda dhiibtaan.
3. Hay'adaha dalka ee u xilsaaran arrimaha doorashooyinka waxa ku waajib ah in ay dadka naafada ah u diyaariyaan saraakiil ka caawiya dhiibashada cod bixinta, haddii ay jiraan caqabado aan saamaxayn in ay u codeeyaan si shakhsi ah.
4. Qof kasta oo dadka naafada ah ka hor istaaga in uu codkiisa dhiibto waxa uu galay faldambiyeed ciqaab ah; oo aanay ciqaabistiisu ka yarayn 1 sano ama/iyo ganaax lacageed oo dhan 2000, 000 SLsh.
5. Dhamaan xisbiyada Qaranka waxa waajib ku ah in ay qoondo xisbi ku meel-mariyaan xubno ku matalaya dadka naafada ah xisbiga.

#### **Qodobka 13aad:**

### **XORIYADAHA DHAQ-DHAQAAQA & IS-ABAABULKA**

1. Qof kasta oo naafo ahi wuxuu xaq u leeyahay in uu u safri karo ama uu degi karo goob kasta oo ka mid ah dalka gudihiisa iyo dibadiisaba, si xeerka waafaqsan.
2. Waxaa reeban in qofka naafada ah laga hor joogsado inuu u socdaalo wadanka debadiisa iyo gudihiisa si taasi la mid ah waxaa raaban in laga hor joogsado ku soo laabashada wadankiisa, hadii aanay jirin sabab sharci oo u diidaysa.
3. Dadka naafada ahi waxay xor u yihiin in ay is abaabulaan oo ay samaystaan ururo xuquuqdooda u dhaqdhaqaaq; isla markaana ay ka qayb qaatan ururada la xidhiidha arrimaha siyaasada, dhaqanka, dhaqaalaha, xirfadaha & shaqaalaha, si xeerka waafaqsan.
4. Waxa reeban urur kasta oo ujeedooyinkiisu ka soo horjeedaan mabaadi'ida dastuurka ama xeerkan.

#### **Qodobka 14aad:**

### **XAQA DARYEEL CAAFIMAAD.**

1. Hay'adaha dawlada ee u xilsaaran arrimaha adeegyada caafimaadka waxa waajib ku ah in ay dadka naafada ah siiyaan adeeg caafimaad oo lacag la'aan ah.
2. Hay'adaha dawlada ee u xilsaaran arrimaha caafimaadka waxa ku waajib ah in ay dejiyaan barnaamijyo la xidhiidha, ka hortaga waxyaabaha sababa naafonimadda, sida naafonimada ay keento xiliga umusha/dhalmada & dabaysha [polio].
3. Hay'adaha dawlada ee u xilsaaran arrimaha caafimaadka waxa waajib ku ah in ay dejiyaan, isla markaana ay hirgeliyaan barnaamijyo wacyigelineed oo ku saabsan xanuunada faafa.
4. Xarumaha caafimaadka ee dawlada & kuwa gaarka loo leeyahay waxa ku waajib ah in dhismayaashooda laga helo adeegyada dadka naafada ah u sahlaya in ay isticmaalaan.
5. Xarumaha caafimaadka ee dawlada ama kuwa gaarka loo leeyahay waxa waajib ku ah in ay diyaariyaan, hirgeliyaana barnaamijyada luuqada dadka maqalka naafada ka ah (**sign language**) iyo

in lagu tababaro shaqaalaha caafimaadka ama la shaqalaysiiyo turjumaano aqoon u leh luuqadaas.

6. Dawlada waxa ku waajib ah inay dhisto xarumo daryeel caafimaad oo socod celin ah (xarumaha dib u habaynta) (rehabilitation centers), si bulshada naafada ahi u helaan adeega ay u bahanyihiin oo lacag la'aan ah.

#### **Qodobka 15aad:**

##### **XAQA WAXBARASHADA & TABABARADA XIRFADEED**

1. Hay'ada dawlada ee u xilsaaran waxa waajib ku ah inay dadka naafada ahi helaan waxbarasho hoose, dhexe, sare iyo heer jamacadeed oo lacag la'aan ah.
2. In ay dadka naafada ahi helaan deegaan waxbarasho oo ku haboon waxa waajib ka saran yahay hay'adaha xuukumada ee u xilsaaran arrimaha waxbarashada.
3. Hay'adaha xukuumada ee u xilsaaran arrimaha waxbarashada waxa uu waajib ka saaran yahay in ay diyaariyaan hababka dadka maqalka & araga naafada ka ahi ay ku heli karaan waxbarashada.
4. Dadka naafada ahi waa in ay helaan barashada xirfadaha farsamada gacanta iyo waxbarashada dadban, iyadoo la ilaalinayo sinaanshaha xuquuqda aadanaha iyo xorriyadaha aasaasiga ahaba ee ku salaysan baahidooda.
5. Dhismayasha waxbarashada ee dawliga ah iyo kuwa gaarka loo leeyahayba waa inay lahaadaan waxyaabaha dadka naafada ah u sahlaya in ay adeegsan karaan.
6. Dawladdu waa inay kor u qaadaa horumarinta waxbarashada dadka naafada ah iyada oo loo marayo;
  - a) Dhiirri -gelinta waxbarashada dadka naafada ah
  - b) Dejinta siyaasadaha iyo qorshayaal kor loogu qaadayo waxbarashada dadka naafada ah.
  - c) Aasaasidda dugsiyada u gaarka caruurta maqalka iyo araga ka naafada oo leh manhaj u gaara.
  - d) Ku tababarida macallimiinta dugsiyada hoose dhexe ee dawlada habka barida carruurta leh baahiyaha gaarka ah.
  - e) Ka taageerida agab ka caawiya waxbarashada oo ku habboon ardayda qaba baahiyaha gaarka ah sida (baskiladaha naafada, biraha socodka, lugaha iyo gacmaha samayska ah, sameecadaha maqalka ka cawiya, usha cad, qalabka iyo teknoolajiyada ka caawiya dadka araga naafada ka qoraalkaiyo akhriska IWM oo bilaa lacag ah.
  - f) In lagu daro 10% miisaniyada waxbarasho dadka naafada ah oo heer kasta leh.
  - g) Bixinta adeegyo gaar ah inta lagu jiro imtixaannada oo ay ku jirto in la siiyo waqti dheeraad ah oo ku habboon ardayda leh baahiyaha naafada gaarka ah.
7. Wasaarada Waxbarashada waxa waajiba ku ah in deeqaha waxbarashada dibadeed ee dalku helo laga siiyo bulshada naafada kooto gaar ah.

#### **Qodobka 16aad:**

##### **XAQA SHAQADA IYO SHAQALAYNTA**

1. Dadka naafada ahi waxa ay xaq u leeyihiin in laga shaqaalaysiiyo goobaha shaqada ee dawlada ama kuwa gaarka loo leeyahay.

2. Goobaha shaqada ee dawlaga ah ama kuwa gaarka loo leeyahay waa in ay ahaadaan kuwo u sahlaya in dadka naafada ahi ay ka hawl-geli karaan; sidoo kalena in ay yeeshaan adeegyada ku haboon baahiyahooda.
3. Way reeban tahay in dadka naafada ah lagu takooro sababo la xidhiidha naafo-nimadooda, sida fursadaha shaqada ee banaanada, dhamaan heerarka kala duwan ee shaqaalaynta & goobta shaqadaba.
4. Hay'ada Shaqaalaha Dawlada waxa waajib ku ah markasta oo shaqaalayn la samaynayo in ay tixgelin gaar ah siiyaan dadka naafada ah, si waafaqsan nidaamka & habraacyada shaqada ee dejisan.
5. Goobaha shaqada ee gasarka loo leeyahay waxa waajib ku ah inay tixgelin gaar ah siiyaan dadka naafada ah, marxaaladaha kala duwan ee shaqaalaynta.
6. Shirkad ama hay'ad kasta oo gaar loo leeyahay oo shaqalysiisa 15-qof oo naafo ah waxay heli doontaa cashuur dhaaf dhan 3%.

#### **Qodobka 17<sup>aad</sup>:**

##### **XUQUUQAADKA GAAR AHAANEED EE DUMARKA & CARUURTA**

1. Dawladu waa inay xaqiijisaa ilaalinta xuquuqda haweenka iyo gabdhaha naafada ah, waxana reeban in lagula kaco tacadi kasta oo ka dhan ah xuquuqdooda, sida takoorka, kufsiga iyo jidh dilka.
2. Qof kasta oo ay maxkamad kaga hor cadaato inu fal kufsi ah kula kacay haweenay ama qof caruur ah oo naafo ah, waxa uu galay faldambiyeed cigaab ah, kaas oo xukunkiisa loo raacayo shareecada Islaamka, Xeerka Cigaabta Guud & Xeerka Kufsiga.
3. Dawlada wax xil ka saaran yahay in ay hirgeliso barnaamijyo shaqo abuur oo u gaar ah haweenka naafada ah.
4. Dawlada waxa waajib ku ah in ay dejiso barnaamijyo lagu horumarinayo xaaladaha & duruufaha nololeed iyo waxbarasho ee caruurta naafada ah.
5. Caruurta naafada ahi waxay xaq u leeyihiin inay cabiraan fikirkooda, isla markana la tix galiyo aragtidooda iyo in laga cawiyo soo gudbinta fikradahooda.
6. Caruurta naafada ahi markay dhashan waxay xaq u leeyihiin in la diiwan galiyo magac fiicana loo bixiyo iyo inay helaan shaahadada dhalashada.

#### **Qodobka 18<sup>aad</sup>:**

##### **XUQUUQDA ADEEGSIGA DHISMAYAASHA DADWEYNAHA**

1. Hay'adaha dawlada ee ku shaqada leh arrimaha qorshaynta & nashqadaynta dhismayaasha waxa waajib ku ah in ay hirgeliyaan barnaamijyo ku saabsan in dadka naafada ah ay adeegsan karaan dhamaan dhismayaasha; iyaga oo ku qeexaya shuruudaha ku xidhan bixinta qandaraasyada.
2. Guddida Naafada Qaranka oo kaashanaysa Wasaarada Hawlaha Guud & Dawladaha Hoose ee dalka waa in ay hubiyaan in dhismayaasha la hirgelinayo dalku ay leeyihiin adeegyada dadka naafada ah u sahlaya in ay isticmaali karaan.

3. Dhamaan dhismayaasha xarumaha dawlada iyo kuwa gaarka loo leeyahayba ee bixiya adeegyada aasaasiga ahi waa in ay yeeshaan barnaamijyo dib loogu qaabaynayo qaab-dhismoodkooda, si loogu nidaamiyo in ay dadka naafadaha ahi adeegsan karaan.
4. Goobaha danta guud, sida Maasaajidada, Goobaha Madadaalada, Goobaha Ciyaaraha, Goobaha Jardiinooyinka nasashada, Goobaha dalxiiska, Wadooyinka, Goobaha dabaasha & Musqulaha Dadweynaha waa in u dhisnaadaan qaab ay adeegsan karaan dadka naafada ahi.

### **CUTUBKA 3<sup>AAD</sup>**

#### **SINAANTA & DABAR-GOYNTA TAKOORKA**

##### **Qodobka 19<sup>aad</sup>**

#### **SINAANTA IYO CIDHIBTIRKA TAKOORKA**

1. Dowlada waxa waajib ku ah in hirgeliso barnaamijyo lagu cidhibtirayo takoorka ka dhanka ah dadka naafada ah.
2. Waxa reeban fal-kasta oo lagu takoorayo dadka naafada ah, kaas oo ku salaysan naafimo-nimada sida, naanaysaha aan haboonayn [langadhow, indhoolow, dhagoolow ama maah-maahyaha aan haboonayn].
3. Qof kasta oo ay cadaato in uu ku kacay fal takoor oo ka dhan ah qof naafo ah; waxa uu galay faldebiyeed ciqaab ah oo ciqaabtiisu aanay ka yarayn 1 sano ama/iyo ganaax lacageed oo dhan Todoba milyan SL shl 7, 000, 000 SLsh.

##### **Qodoba 20<sup>aad</sup>:**

#### **REEBANAANTA TAKOORKA KA DHANKA AH WAXBARASHADA**

1. Waxa reeban fal-kasta oo lagu takoorayo dadka naafada ah kaas oo ku salaysan waxbarashada qaybaheeda kala duwan.
2. Waxa reeban in caruurta lagaga reebo heerarka waxbarashada sababo la xidhiidha naafanimadooda.
3. Waaliidiinta ama qof kasta oo ka mas'uul ah caruur naafo ah waxa waajib ku ah in uu geeyo dugsi waxbarasho oo ku haboon.
4. Waalid kasta oo haysta ama masuul ka ah ilmo naafo ah, kaasi oo gaadhay xilligii waxbarashada, balse ku guuldaraysta inuu geeyo goobaha waxbarashada waxaa la ganaaxayaa lacag dhan laba milyan SI shl 2,000,000/=
5. Waxa reeban ah in xarumaha waxbarashada & shaqaalaha ka shaqeeyaaba ay takooraan arday naafo ah, qof kasta oo ay ku cadaato takoor, waxa uu galay fal-dembiyeed ciqaab ah oo ciqaabtiisu tahay 1 sano ama/iyo ganaax lacageed oo dhan 3000, 000 SLsh.

##### **Qodobka 21<sup>aad</sup>:**

#### **REEBANAANTA TAKOORKA DHANKA AH ADDEGYADA CAAFIMAADKA**

1. Waxa reeban nooc kasta oo takoor ah oo ku ay shaqaalaha xarumaha caafimaadku kula kacaan dadka naafada ah, qof kasta oo shaqaale caafimaad ah oo ay ku cadaato in uu takoor kula kacay qof naafo ah, waxa uu galay fal-dembiyeed ciqaab ah waxaana lagu ciqaabayaa xadhig aan ka yarayn 1 sano ama/iyo ganaax lacageed oo dhan 4, 000, 000 SLsh.



## **Qodobka 22<sup>aad</sup>:**

### **REEBANAANTA TAKOORKA DADKA NAAFADA AH EE GOOBAHA SHAQADA**

1. Way reeban tahay nooc kasta oo takoor ah oo lagula kaco dadka naafada ah goobaha shaqada dhexdooda; qof kasta oo ay ku cadaato in uu takoor ku salaysan shaqada uu kula kacay qofka naafada ah goobta shaqada dhexdeeda waxa uu galay fal-dembiyeed ciqaab ah oo ay ciqaabtiisu tahay 1 sano oo xadhig ah ama/iyo ganaax lacageed oo dhan 2, 000, 000 SLsh.
2. Xeerkani waxa uu reebayaa heshiis kasta oo shaqo oo ka horimanaya mabaadi'ida ku xusan xeerkan ama xeerarka kale ee shaqada ee dhaqan-galka ah.

### **CUTUBKA 4<sup>AAD</sup>**

### **AASAASIDA GUDDIDA NAAFADA QARANKA**

## **Qodobka 23<sup>aad</sup>:**

### **DHISMAHA GUDIDA NAAFADA QARANKA**

1. Xeerkan waxa lagu aasaasay Guddida Naafada Qaranka (National Disability Commission) Jamhuriyada Somaliland.
2. Gudidu waxay ka kooban tahay sagaal xubnood (9) oo lagu soo magacaabay hab digreeto Madaxweyne oo matali doonta qaybaha kala duwan ee dadka Naafada ah iyo kuwa u adeega
3. Xubnaha guddidu waxa ay ka koobnaan doonaan:
  - a) 2 xubnood oo naafada jidhka ah,
  - b) 2 xubnood oo naadada araga ah,
  - c) 2 xubnood oo naafada maqalka ah, iyo
  - d) 3 xubnood oo aan naafo ahayn laguna soo doortay, aqoonta & adeegyada ay u hayaan arrimaha dadka naafada ah.
4. Xubnahaas matalaya Gudidda Naafadda Qaranka ugu yaraan 3 ka mid ahi waa in ay noqdaan haween
5. Xarunta guud ee gudidu waxay noqon doontaa Caasimadda dalka JSL, gobaladana waxay ku yeelan karaan xarumo.
6. Mudo xileedka Gudidu waa 5 sanno oo ka bilaabmayso maalinta madaxweynuhu magacaabo.

## **Qodobka 24<sup>aad</sup>:**

### **SHURUUDAHA XUBNAHA GUDDIDA**

Qof kasta oo ka mid noqonaya Gudidda Naafada Qaranka waxa laga rabaa in uu buuxiyo shuruudahan soo socda:

- a) In uu muslim yahay, kuna dhaqmaa Diinta Islaamka;
- b) In uu muwaadin yahay, da'diisuna aanay ka yarayn 30 sanno;
- c) In uu caqli & maskax ahaan u gudan karo waajibaadkiisa shaqo;
- d) In uu leeyahay aqoon heer Jaamacadeeda ama waayo aragnimo u dhiganta.
- e) In aanu ku dhicin xukun maxkamadeed oo ciqaab ahi 5<sup>th</sup> sano ee u dambeeyay.

## **Qodobka 25<sup>aad</sup>:**

## **HABKA SOO XULISTA & MAGACAABIDA GUDDIDA**

1. Xubnaha Gudidu waxay ka iman doonaan Hayaddaha Dawaladda iyo kuwa Madaxbaanaan, waxa aanay noqon doonaan sidan:
  - a) 3 Xubnood oo uu soo magacaabay Wasiirka Wasaaradda Shaqo-galinta, Arrimaha Bulshada iyo Qoyksa.
  - b) 1 Dallada Ururada Naafada ee SNDF
  - c) 1 Wasaarada Cadaalada iyo Garsoorka
  - d) 1 xubin oo uu soo magacaabay Gudoomiyaha Komishanka Xuquuqal Insaanka Qaranka,
  - e) 1 xubin oo uu soo magacaabay Wasiirka Waxbarashada & Sayniska JSL
  - f) 1 xubin oo uu soo magacaabay Wasiirka Wasaarada Caafimaadka JSL
  - g) 1 xubin oo uu soo magacaabay Wasiirka Diinta & Awqaafta
2. Madaxweynuhu wuxuu qoraal ku wargelin doonaa Hayaddaha soo Xulaya Xubanaha Gudidda Naafadda Qaranka mudo 14 maalmood gudahood si ay u soo gudbiyaan liiska soo xulistooda.
3. Madaxweynuhu waxa uu digreeto ku magacabayaa xubnaha kama-danabaysta ah ee Gudida Naafadda Qaranka mudo 30 maalmood ah, oo ka bilaabmaysa maalintii loo soo gudbiyay.
4. Wasiirka Wasaaradda Shaqo-galinta Arrimaha Bulshada Qoysku waxa uu fahigooda koowaad isugu yeedhauaa Xubnaha Gudida Naafadda Qaranka mudo 14 casho ah oo ka bilaabmaysa maalintii Madaxweynuhu magacaabay.
5. Xubnaha Gudidu waxay isla fadhigaasi ku dooranayaan Gudoomiye, Gudoomiye Ku Xigeen.
6. Komishanku waxa uu yeelan doonaa Agaasimaha Fulinta oo Madaxweynuhu ku soo magacaabi doono digreeto.

### **Qodobka 26<sup>aad</sup>:**

#### **WAAJIBAADKA & SHAQOYINKA GUDDIDA**

Wajibaadka Gudida Naafadda Qaranka waxaa ka mid ah kuwan soo socda:

1. In ay dejiso Qorayaasha iyo Barnaamijyadda lagu Horumarinaayo dadka Naafadda ah.
  - a) Inay guddigu samayso barnaamijyo lagu maal-gelinayo dadka naafada ah eel eh hal abuurimo
  - b) Inay guddigu dejiso barnaamijyo wakhtiga dhaw iyo ka dheerba oo lagu cidhib tirayo fakhriga iyo saboolnimda ku habsatay dadka naafada ah.
  - c) Inay guddigu dejiso barnaamij lagaga hor tegayo arrimaha keena naafanimada iyaga oo la tashanaya hay'adaha ay khusayso
2. In ay si buuxda u hirgaliso siyaasaddaha khuseeya arrimaha daryeelka naafadda
3. In ay dabagal iyo xaqiijin ku samayso tacadiyadda ka dhan ka ah dadka naafadda ah.
4. In ay hirgaliso barnamijyo wacyigelineed oo kor loogu qaadayo xuquuqda iyo duruufaha ku xeeran dadka naafada ah.
5. Guddigu waa inay dejiso qorshe laagu dhisayo goobo isboorti oo ay leeyihiin dadka naafada ahi, goobahaasi oo leh dhamaan noocyada isboorti eek ala duwan
6. Inay isku xidhaan, mideeyaana dedaalada iyo wax qabadyada lagu horumarinayo Dallada Guud ee naafada, ururada naafada, ururada adeeg biyayaasha naafada.

7. In ay kormeeraan hay'addaha bixiya adeegyada bulshada iyo in ay ka talo-bixiyaan sidii loogu dari lahaa dadka naafada ah barnamijyadda horumarineed.
8. In ay u doodaan/qareemaan wax ka badalka iyo kaabista Xeerarka iyo Siyaasaddaha Caqabada ku ah Naafadda.
9. In ay Golayaasha Qaranka u soo jeediyaan talooyin ku wajahan ilaalinta iyo dhawrida Xuquuqda aasasiga ah ee dadka naafada ah.
10. In ay la xidhiidhiyaan dhamaan Hayaddaha Calaamiga, Maxaliga, iyo daneeyayaasha arrimaha naafada.
11. Qabashada shirar heer qarana oo lagaga hadlayo arimaha naafada
12. In ay tirro koobaan dadka naafadda ah ee ku dhaqan dhamaan goboladda iyo degmooyinka dalka.
13. Inay samaystaan xeer hoosaad (Code of conduct) ay ku wada shaqeeyaan
14. Guddigu waxay soo saari doonaan warbixin sanadle ah oo ka hadlaysa arrimaha Naafada (Unual Disability Report).

**Qodobka 27<sup>aad</sup>:**

**WAJIBAADKA SHAQO EE GUDOOMIYAHA**

Wajibaadka Gudoomiyaha Gudida Naafada Qaranka waxaa ka mid ah:

1. In uu yahay/tahay Masuulka ugu sareeya Guddida Naafada Qaranka
2. In/ay uu gudoomiyo/so shirarka Gudida Naafadda Qaranka
3. In/ay uu masuul ka noqdo jihatya Arrimaha iyo maamulka Gudida Naafadda Qaranka.
4. In uu dabo-galo ama la socdo shaqada xubnaha gudida iyo agaasimaha fulinta
5. In uu/ay qabashadda shirarka gudida joogto.
6. Inuu/ay saxeexi karo heshiisyada ay hay'ada Naafada Qaranku la gasho cid kale.
7. Waxa uu saxeex ku leeyahay dhamaan hanaanka lacag bixinta ee hay'ada naafada Qaranka.

**Qodobka 28<sup>aad</sup>:**

**SHAQOYINKA G/XIGEENKA GUDDIDA**

Shaqooyinka G/xigeenka waxa ka mid ah:

1. In/ay qabto hawlaha shaqo ee xafiiska marka gudoomiyuhu maqan yahay.
2. In/ay qabto shaqooyinka uu Gudoomiyuhu u ig-mado.

**Qodobka 29<sup>aad</sup>:**

**SHURUUDAHA WAAYITAANKA XUBINIMADA GUDDIDA**

Xubnaha Gudida Naafada Qaranku xilkeeda waxa ay xubinimada ku waayayaan:

1. Hadii ay geeri ku timaado xubinta.
2. Hadii ay xubintu u gudbiso Gudoomiyaha Gudida iyo Madaxweynaha qoraal shaqo ka tagis ah.
3. Hadii uu xubinta ku dhaco xukun ciqaabeed oo kama dambays ah.
4. Hadii ay xubintu gudan kari waydo xilkiisa sababo caafimaad-darro ama bukaan maskaxeed awgeed, taas oo uu soo cadeeyay dhakhtar la aqoonsan yahay.
5. Hadii xubintu ka maqnaato 3 fadhi oo isku xiga cudur daar la'aan.

**Qodobka 30<sup>aad</sup>:**

**XIL-KA QAADISTA GUDOOMIYAHA AMA G/XIGEENKA GUDDIDA**

1. Gudoomiyaha xilka qaadidiisu waxay ku iman kartaa sababahan:
  - a) In uu gudan kari waayo xilkiisa sabab caafimaad oo ay laga soo cadeeyay dhakhtar la aqoonsan yahay.
  - b) In uu/ay is casilaad u soo gudbiyo xubnaha guddida
  - c) In uu/ay ku dhacdo xukun cigaabeed maxkamad horteed kaga cadaado
  - d) In ay soo jeediyaan 51% xilka qaadistiisa, isla fadhigaasina ay isku raacaan 2/3 tirada guud ee xubnaha.
  - e) Fadhiga xil ka qaadista gudoomiyaha waxaa gudoomin doona Wasiirka Wasaarada Shaqo-gelinta, Arrimaha Bulshada & Qoyska ama cidii uu u igmado

**Qodobka 31<sup>aad</sup>:**

**HABKA DOORASHADA GUDDOOMIYAHA IYO K/XIGEENKA GUDDIDA**

1. Gudidda Naafada Qaranku waxa ay fadhigooda koowaad iska dhex dooran doonaan Gudoomiye & Gudoomiye ku xigeen.
2. Habka doorashadu waxa ay noqon doontaa gacan taag ku salaysan hal-dheeri.
3. Fadhiga ugu horeeya ee lagu dooranayo Gudoomiyaha iyo ku xigeenka waxaa qaban doona Wasiirka wasaarada Shaqo-gelinta, Arrimaha Bulshada iyo Qoyska ka dib marka uu helo warqada magacaabista ee Madaxweynaha
4. Muddada fadhigaasi uu ku qaban doono wasiirku waa 14-maalmood oo ka bilaabanta taariikhda magacaabista xubnaha uu soo magacaabay Madaxweynuhu.
5. Qabashada fadhigaasi waxa Wasiirka Wasaarada Shaqo-gelinta ku waajib ah inuu soo saaro qoraal uu ku mudaynayo maalinta, saacada iyo goobta uu fadhigu ka dhacayo isla markaana waa in dhamaan xubnaha gudiga uu soo magacaabay madaxweynuhu la gaadhsiiyaa qaraalkaasi muddo 48-saacadood ka hor.
6. Hanaanka fadhigaasi lagu dooranayo Gudoomiyaha iyo Ku xigeenkiisa waxaa ka mid ah:
  - a) Wasiirka Wasaaradu waa inuu hubiyaa inay fadhiga joogaan tiradii uu ku furmi lahaa oo ah hal dheeri tirada guud ee xubnaha (51%)
  - b) Wasiirka Wasaaradu waa inuu ku dhawaaqaa in ay soo gudbiyaan xubnaha u taagan murashaxnimada xillalka Gudoomiyaha iyo ku xigeenkiisa
  - c) Waa in ay Wasiirka u soo gudbiyaan codsigooda musharaxnimo xubnaha u taagan xilka Gudoomiyaha iyo Gudoomiye ku xigeenka, codsigaasi oo ay la socoto taariikh nololeedkoodii (CV), Warqada danbi la'aanta, iyo Warqada Caafimaadka.
  - d) Wasiirka Shaqo-gelintu marka uu helo codsiyada dhamaan xubnaha u taagan murashaxnimada xillalka gudoomiyaha iyo ku xigeenka waxa uu hubin doonaa inay buuxiyeen shuruudaha u tartamida xillalkaasi.
  - e) Wasiirku marka uu hubiyo codsiyada loo soo gudbiyey ka bacdi waxa uu ku dhawaaqi doonaa magacyada murashaxiinta liiska kama danbaysta ah ee u taagan murashaxnimada xillalka Gudoomiyaha iyo Gudoomiye ku Xigeenka.

- f) Wasiirku waxa uu cod gacan tag ah u qaadi doonaa magacyada murashaxiinta u taagan xilka Gudoomiyaha Guddiga Naafada Qaranka ee shanta sanno ee soo socota, isaga oo u kala horaysiinaya sida ay u soo kala horeeyeen codsiyada murashaxnimadoodu.
- g) Wasiirku waxa uu ku dhawaaqi doonaa tirada codadka ay kala heleen xubnaha murashaxiinta ee tartamayey jagada Gudoomiyaha, waxaana uu si gaar ah ugu dhawaaqi doonaa murashaxa helay codadka ugu badan oo noqon doona Gudoomiyaha Guddiga Naafada Qaranka JSL ee shanta Sanno ee soo socda.
- h) Hadii ay dhacdo in ay is leekaadaan codadka murashaxiinta u tartamay jagada Gudoomiyaha iyo ku xigeenka laba murashax iyo in ka badan, ayna murashaxiinta ka mid yihiin (xubno naafo ah iyo xubno aan naafo ahany, xubnaha naafada ahi waxa ay yeelan doonaan {Custel Vote} codka kalsoonida ah).
- i) Hadii ay dhacdo inay is leekaadaan codadka laba murashax ama ka badan oo naafo ahi Wasiirku waxa uu qaban doonaa Wareeg labaad, wareegaasi ka hor waxa uu Wasiirku siin doonaa xubnaha guddiga iyo murashaxiintooda wakhti kooban oo ay sameeyaan wada tashi gudahooda ah wakhtigaasi waa inaanu ka badnaan hal saac.
- j) Doorashada Gudoomiye ku xigeenka waxaa loo raaci doonaa hanaanka loo maray gudoomiyaha ee ku sheegan isla qodobkan lixaad, firqadihiisa kala duwan.

#### **Qodobka 32<sup>aad</sup>:**

##### **BUUXINTA JAGADA BANAANATA EE GUDDIDA**

1. Madaxweynaha ayaa soo magacaabaya xubintaas jagadeedu banaanaatay.
2. Haddii xubinta jagada banaysay ay tahay Gudoomiyaha, muddada Gudoomiye lagu dooranayo waxa xilka si ku meel gaadh ah u sii haynaya Gudoomiye ku xigeenka Guddida.
3. Fadhiga lagu dooranayo gudoomiyaha Waxaa gudoomin doona Wasiirka Wasaarada Shaqo-gelinta, Arrimaha Bulshada & Qoyska sida ku cad Qodobka 31<sup>aad</sup>, firqadiisa lixaad ee isla xeerkan

#### **Qodobka 33<sup>aad</sup>:**

##### **SHAQOOYINKA AGAASIMAHA FULINTA**

Agaasimaha fulinta oo ah madaxa maamul ee Hay'ada Naafada Qaranka oo uu magacaabidiisa iyo xil ka qaadistiisa uu Madaxwaynuhu leeyahay xilkiisa iyo waajibaadkiisu waa:

1. Fulinta go'aamada ka soo baxa fadhiyada Gudiga Naafada Qaranka
2. Fulinta barnaamijyada shaqo maalmeedka Hay'ada Naafada Qaranka
3. Daba-galka iyo qiimaynta shaqada, shaqaalaha iyo madaxda waaxyaha iyada oo la raacayo Xeerka Shaqaalaha Dawladda
4. Xidhiidhinta Xarunta iyo Gobollada/degmooyinka.
5. U soo gudbinta Gudoomiyaha Gudiga Naafada Qaranka warbixino ku saabsan halka shaqada Hay'adu marayso.
6. Xidhiidhinta iyo Dabagalka hawlaha horumarineed ee Hay'ada Naafada
7. Diyaarinta Qorshaha dhaw iyo kan fogba ee Hay'ada Naafada Qaranka isaga/iyada oo laga shiidaal

qaadanayo Qorshaha guud ee Qaranka.

8. Ka qaybgelida shirarka farsamo ee heer qaran iyo caalami ee loo xilsaaro.
9. Diyaarinta iyo isku dubaridka miisaaniyadda Hay'ada Naafada isagoo/iyadoo la xidhiidhay, madaxda waaxaha, saraakiisha goboladda/degmooyinka ee sar sare iyo qaybaha naafada ee hay'adu u adeegto marka ay lagama maarmaan noqoto si uu ugu gudbiyo Gudoomiyaha iyo kulamada Gudiga Naafada Qarankaba
10. Kor-joogtaynta iyo hubinta isu dheelitirka dakhliga iyo kharashaadka.
11. Soo saarista xisaab xidh sannadeedka.
12. Qorshaynta iyo diyaarinta tabo-barada shaqaalaha xarunta iyo gobolada/degmooyinka
13. Kharashgaraynta kharaashaadka ku jira miisaaniyadda iyo mashaariicda, ka dib marka uu la tashado gudoomiyaha Gudiga.
14. Ka qayb-gelida dejinta qorshaha qaranka isagoo ka wakiil ah Hay'ada Naafada Qaranka

**Qodobka 34<sup>aad</sup>:**

#### **XIL-KA QAADISTA AGAASIMAHA MAAMULKA**

Agaasimaha Fulinta waxaa xilka lagaga qaadayaa siyaabahan soo socda:

1. Agaasimaha Fulinta waxaa xilka ka qaadaya Madaxweynaha marka uu helo soo jeedinta xubnaha Gudiga Naafada Qaranka
2. Marka ay xilka qaadistiisa soo jeediyaan 2/3 tirada guud ee xubnaha Gudiga Naafada Qaranku isla markaana soo sababeeyaan isla markaana ay ku jiraan xubnaha soo jeedinta keenay Gudoomiyaha iyo ku xigeenkiisu
3. Marka ay timaado xaalad uu gudan kari waayo shaqadiisa sababo caafimaad daro iyo bukaan maskaxeed oo dhakhtar la aqoonsan yahay cadeeyo.
4. Marka ay timaado xukun ciqaabeed oo ku dhaca maxkamad horteed

#### **CUTUBKA 4AAD**

#### **WAAJIBAADKA & MAS'UULIYADAHA DAWLADA**

**Qodobka 35<sup>aad</sup>:**

#### **GUDASHADA WAAJIBAADYADA LA XIDHIIDHA XUQUUQAADKA AASAASIGA AH**

1. Gudida Naafada Qaranka iyo dhaman hay'adaha dawliga ah ee ku lugta leh arrimaha naafada waxa uu waajib ka saranyahay, ilaalinta, kor u qaadida & hirgalinta xuquuqda & xoriyadaha aasaasiga ah ee dadka naafada ah.
2. Gudida Naafada qaranku waxa waajib ka saranyahay hirgalinta xuquuqaadka dadka naafada ah ee xeerkan qeexay.
3. Dhamaan hay'adaha dawlada waxa uu waajib ka saaran yahay hirgelinta & ilaalinta xuquuqaha dadka naafada ah ee xeerkan ama xeer kale oo dhaqangal ahi uu qeexay.

**Qodobka 36<sup>aad</sup>:**

#### **HIRGELINTA BARNAAMIJYO LA XIDHIIDHA LUUQADA DADKA MAQALKA KA NAAFADA AH**

### **[SIGN LANGUAGE]**

1. Gudida Naafada Qaranku waxa ku waajib ah in ay hirgaliso barnaamijyo kor loogu qaadayo luqada dadka maqalka naafada ka ah (sign language), sida helida xogaha dalka, ku darida manahjka wax barashada.

#### **Qodobka 37aad:**

#### **HIRGELINTA BARNAAMIJYO WACYIGELINEED OO LA XIDHIIDHA XUQUUQDKA AASAASIGA AH EE DADKA NAAFADA AH**

1. Dawladdu waa inay hirgalisaa barnaamijyo kor loogu qaadayo ololaha wacyi -gelinta si loo dhawro xuquuqda dadka naafada ah ee ku xusan Xeerkan.
2. Gudidu waa in ay qaada tallaabooyin kor loogu qaado wacyiga bulshada guud ahaan si loo joojiyo takoorka ka dhanka ah xuquuqda naafada ah.

#### **Qodobka 38aad:**

#### **DEJINTA BARNAAMIJYO AMA SIYAASADO LAGU HORUMARINAYO ARRIMAHA AMA XUQUUQAHA DADKA NAAFADA AH**

1. Gudida Naafada Qaranku waa in ay:
  - a) Dejisaa siyaasado iyo qorshayaal lagu horumarinayo xuquuqda dadka naafada ah.
  - b) Daba gashaa siyaasadahii iyo shurucdii hor u jiray, soona jeedisaa talooyin ku saabsan wax-kabedat & kaabis, hadii ay u arkaan in ay ka hor imanayaa xuquuqaha xeerkan uu qeexay.
  - c) Dabagashaa qorshayaasha mashariicda horumarineed iyo kuwa bani-aadanimadaba in ay qayib ka yihiin dadka naafada ahi iyo in kale.

#### **Qodobka 39aad:**

#### **KORMEERKA & KORJOOGTAYNTA ADEEGYADA ARIMAHA BULSHADA EE DADKA NAAFADA AH**

1. Gudidda Naafada Qaranku waa in ay kormeertaa, hubisaana adeegyada ay bixinayaan ama laga helo in ay dadka naafada ahi qayb ka yihiin dhamaan goobahan soo socda:
  - a) Dhamaan Goobaha caafimaadka Cusbitaalada dadweynaha;
  - b) Dhamaan Goobaha waxbarashada;
  - c) Dhamaan Goobaha cibaadada; &
  - d) Dhamaan Goobaha ganacsiga ama madadaalada.
  - e) Dhamaan goobaha adeegyada sharci sida: Saldhiyada booliska, Xafiisyada Xeer illaalinta, Maxkamadaha iyo Xabsiyada ay yihiin kuwo ay adeegsan karaan dadka naafada ahi

## **CUTUBKA 5<sup>AAD</sup>**

### **DIIWAANGELINTA URURADA AMA DALLADAHA DADKA LA NOOL NAAFO-NIMADA**

**Qodobka 40<sup>aad</sup>:**

#### **NOOCYADA URURADA**

Ururada ka shaqeeya arrimaha dadka naafada ahi waxa ay noqon doonaan noocyadan soo socda:

- a) Dallada ay ku bahoobeen ururada Naafada ahi.
- b) Ururada dadka jidhka ka naafada ah.
- c) Ururada dadka maqalka ka naafada ah.
- d) Ururada dadka araga ka naafada ah.
- e) Ururada u adeega dadka naafada ah.

**Qodobka 41<sup>aad</sup>:**

#### **DIIWAAN-GELINTA URURADA**

1. Wasaarada Shaqo-gelinta, Arrimaha Bulshada & Qoyska JSL waxay masuul ka tahay diwaan galinta noocyada kala duwan ee ururada naafada ah.
2. Wasiirka Wasaarada Shaqo-gelinta, Arrimaha Bulshada & Qoyska ayaa saxeexaya shahaadada diiwaan-gelinta ururada dadka naafada ah ama cidii uu u igmado

**Qodobka 42<sup>aad</sup>:**

#### **CODSIGA DIIWAA-GELINTA URURADA**

1. Codsiga kasta oo diiwaan-gelinta urur naafo waa in loo gudbiyaa Xafiiska Agaasimaha Waaxda Naafada ee Wasaarada Shaqo-gelinta, Arrimaha Bulshada & Qoyska ama xafiisyada Isu duwayaasha heer gobol.
2. Codsiga diiwaan-gelinta waa in laga helaa dhamaan shuruudaha diwaangelinta ee ku qeexan qodobka 43<sup>aad</sup> ee Xeerkan.

**Qodobka 43<sup>aad</sup>:**

#### **SHURUUDADAHA DIIWAAN-GELINTA**

1. Urur kasta oo naafo oo waddani ah waa inuu is-diiwaan geliyaa isaga oo raacaya shuruudaha Xeerkan;
2. Waa in uu leeyahay xafiis shaqeeya iyo goob degsiimo oo sugan, magac iyo astaan (logo) u gaar ah.
3. Waa in uu leeyahay dastuur uu sharciyaqaan(professional lawyer) soo ansixiyay, taas oo ay dhammaan xubnaha aasaasayaashu ku saxeexan yihiin;
4. Waa in uu leeyahay qaab-dhismeed awoodahiisu kala qeexan yihiin;



5. Waa in hadafkiisa, ujeedadiisa iyo hawl-qabadyadiisu ay waafaqsan yihiin xeerarka dalka;
6. Waa in uu xafiiska diwaangelinta u soo qortaa codsi ay ku qeexan tahay:
  - a) Magaca ururka, xarfaha loo soo gaabiyo (markay jiraan), xarunta iyo laamaha ururka (markay laamo jiraan), ciwaanka ururka oo ku jiraan telefano iyo cinwaanka internetka;
  - b) Xubnaha Guddida Hogaaminta iyo xubnaha wakiilada
  - c) Magacyada xubnaha asaasayaasha ururka, shaqooyinka iyo ciwaanadooda.
  - d) Ujeedada ururka ama dallada iyo;
  - e) Degaanada uu ka hawlgelayo.
7. Codsiga diiwaangelinta waa in ay ku saxeexan yihiin xubnaha asaasayaasha ahi
8. Codsiga diiwaangelinta lagu dalbanayo waa in ay ku lifaaqan yihiin:
  - a) Nuqul ka mid ah dastuurka ururka ama dalladu;
  - b) Faahfaahin kooban oo khuseysa magacyada iyo saxeexyada xubnaha asaasayaasha;
  - c) Taariikh-nololeedka asaaseyaasha (CV) iyo sawiradooda iyo caddayn dembi-la'aneed ee xubnaha aasaasayaasha
  - d) Rasiidhka bixinta cashuurta diiwaangelinta.
9. Ma banaana in la diiwaan geliyo urur leh astaamo Qabiil ama dadka ku bahoobay ururkaasi ay isku hayb yihiin

#### **Qodobka 44<sup>aad</sup>**

##### **DASTUURKA URURKA**

Urur ama dallad kasta oo naafo waa in uu yeeshaa dastuur ay ku qeexan yihiin ugu yaraan tusmooyinkani:

- a) Magaca rasmiga ah ee Ururka oo aan hore loogu diiwaangelin cid hore;
- b) Hadafka, ujeedada iyo hawlaha Ururka;
- c) Tirada xubnaha asaaseyaasha ururka;
- d) Habraaca ku biirista ama ka bixida xubinimada;
- e) Astaanta iyo goobta degsiimada xarunta guud;
- f) Shuruudaha doorashada hogaanka;
- g) Hab-raaca doorashada hogaanka iyo metelayaasha (representatives) iyo luminta xubinimada metelayaasha ama hogaanka;
- h) Habraaca qabashada shirarka iyo kulamada guud iyo noocyadooda;
- i) Awoodaha iyo masuuliyadaha shirwaynaha, hogaanka iyo metelayaasha;
- j) Xadiga qaadhaanka ee xubnaha;
- k) Hab-maamulka hantida iyo maaliyada;
- l) Account xisaabeed ka furan Baanka JSL ama Baananka gaarka loo leeyahay oo shaqaynaya SI.Shl ama \$USD, kuna qoran magaca ururka
- m) Account ZAAD oo ku diiwaan gashan Magaca ururka/Dallada hadii uu jiro
- n) Habraaca anshax-marinta xubnaha;
- o) Shuruudaha dhamaadka ama kala-dirida (conditions for dissolving) iyo;
- p) Xaalada maamulka iyo maaraynta hantida hadii la kala diro (dissolved by any means).

#### **Qodobka 45<sup>aad</sup>:**

### **SHAHAADA URURNIMO IYO DIB U CUSBOONAYSIINTEEDA**

1. Urur kasta oo si xeerkan waafaqsan loo diwaan-geliyo, waxa la siinayaa shahaado ururnimo.
2. Shahaadada waxa lagu muujinayaa taariikhda ay soo baxday iyo taariikhda ay dhacayso.
3. Mudada ugu badan ee ay shahaadadu dhaqan-galka tahay waa 1 sano.
4. Shahaadada waxa la cusboonaysiinayaa sanad-kasta dhamaadkiisa, taas oo ururka looga baahan yahay warbixin koobsanaysa guulaha, caqabadaha iyo hawl-qabadyada uu gaadhay sanadkaas.

**Qodobka 46<sup>aad</sup>:**

### **TIRTIRIDA SHAHAADADA URURNIMO (CANCELTION FOR CERTIFICATE OF REGISTRATION)**

1. Wasiirka Wassaaradu waxa uu tirtiri karaa shahaadada diwaan-gelinta ee Ururnimo hadii la helo waxyaabahan soo socda:
  - a) Hadii ururku uu shahaadada ku helay khiyaamo ama qaab khaldan;
  - b) Hadii Dastuurka ama ujeedooyinka ururka laga helo waxyaabo ka soo horjeeda mabaadi'ida xeerkan; ururkuna uu ku guul-daraysto in uu saxo;
  - c) Hadii la helo in uu ururku ka qayb qaatay hawl-qabadyo xeerkani ka reebay, ama aanu qeexin dastuurka ururkaasi;
2. Wassaaradu waxa ay hubinaysaa ama dabagelaysaa fulinta ama dhaqan-galka go'aanada khuseeya tirtirida shahaadada ururnimo iyo soo geba-gebaynta guud ahaan hawlqabadyada ururka (marka sidaas go'aan maxkamdaeed lagu soo saaro).

**Qodobka 47<sup>aad</sup>**

### **OGEYSIINTA TIRTIRIDA SHAHAADADA DIWAAN-GELINTA EE URURKA**

1. Hadii la tirtirayo shahaadada diwaangelinta, waa in ay muddo 30 maalmood gudaheed ah Wassaaradu ku ogeysiisaa ururka ay khasayso.
2. Wasiirka Wassaaradu waxa uu wareegtada ku qeexayaa asbaabta keentay tirtirida shahaadada diwaan-gelinta, waxaana ururka la siinaysaa fursad uu isaga difaaco.
3. Wasiirka Wassaaradu awood uma laha inuu jideeyo asbaab aan ahayn kuwa ku xusan qodobka 46<sup>aad</sup> (1) ee xeerkan.
4. Marka ay Wassaaradu ogeysiiso asbaabta tirtirida shahaadada diwaan-gelinta ururka ay khasayso, isla mudada ku xusan farqada 1<sup>aad</sup> ee qodobkan; hadii uu wax jawaab ama is-difaac ah ku soo celin waayo muddadaas gudaheeda, sidaasna ku dhamaato mudadii; Wassaaradu waxa ay si rasmi ah u tirtiraysaa shahaadada diwaan-gelinta.

**Qodobka 48<sup>aad</sup>**

### **OGOLAANSHAHA AMA DIIDMADA EE DIWAAN-GELINTA**

1. Madaxa xafiiska diwaan-gelinta Ururada Naafada ee Wassaaradu markuu helo codsiga diiwaangelinta, wuxuu hubinayaa in dhammaan shuruudaha ku sheegan qodobka 43<sup>aad</sup> ee xeerkan uu buuxiyay, isagoo marka uu u arko lama huraan qaadaya talaabooyinkan:
  - a) In uu dalbado soo dhamaystir macluumaad ama nuqulo waraaqo ah (documents) ka dhiman ama;

- b) In uu dalbado ama raadiyo cadaymo dheeraada ah.
2. Madaxa Xafiiska Diwaan-gelinta Ururada Naafadu marka uu helo codsiga diwaan-gelinta oo dhamaystiran waxa uu hakinayaa codsiga diwaan-gelinta ilaa la saxayo:
  - a) Hadii aanu codsaduho buuxin shuruudaha ku xusan qodobka 43<sup>aad</sup> ee Xeerkan ama xeer-hoosaadyada ka farcama;
  - b) Hadii ujeedooyinka iyo Dastuurka codsaduho ay yihiin kuwo ka hor imanaya xeerkan;
  - c) Hadii magaca ama ujeedada codsaduho ay la mid yihiin mid urur hore u jiray ama Khalkhal gelinaya xubnihiisa ama hawlaha qaranka;
3. Madaxa Xafiiska Diwaan-gelinta Ururad Naafadu markuu hubiyo in shuruudaha xeerkan ay dhamaystiran yihiin, macluumaadka loo soo gudbiyayna sax yahay, waxa uu u gudbinayaa Wasiirka Wassaarada, codsiga diwaan-gelinta oo ay ku lifaaqan yihiin, dhammaan macluumaadka uu ka helay codsadhaha iyo warbixin koobaysa talaabooyinkii uu qaaday ama xog dheeraada ku helay baadhistiisii oo ay weheliyaan talooyinkiisa.
4. Wasiirka Wassaaradu, marka uu helo macluumaadka faqrada 2<sup>aad</sup> ee qodobkan ku xusan, wuxuu hubinayaa jawaabna ka bixinayaa codsiga diiwaangelinta, isaga wareegto sababaysan ku soo saaraya:
  - a) In Ururka diiwaangelinta soo dalbaday uu u qalmo in la diiwaangeliyo marka uu ku qanco, In uu buuxiyay shuruudaha xeerka ku qeexan iyo In Dhammaan macluumaadkiisu dhab yihiin.
  - b) In Ururka diiwaangelinta soo dalbaday aanu u qalmin in la diiwaangeliyo, marka ay u cadaato, in aanu buuxin shuruudihii xeerku u dhigay ama in aanay dhab ahayn macluumaadka uu soo gudbiyay.
  - c) In baadhis dheeraada iyo cadaymo kale oo ku go'aan qaato loo baahan yahay.
5. Wasiirku marka uu ku soo saaro wareegto go'aanada ku qeexan xarafka (a) ee faqrada 3<sup>aad</sup> ee qodobkan, waxay go'aanka ogolaanshaha diiwaangelinta u gudbinayaa Madaxa Xafiiska Diiwaangelinta Ururada Naafada, kaas oo u samayn doona, tixraac iyo fayl u gaar ah una soo saari doona shahaadada diiwaangelinta.
6. Go'aanka uu Wasiirka Wassaaradu ku soo saaro wareegtadu, hadii uu yahay mid diidmo ah, waxa uu Madaxa Xafiiska Diiwaang-gelintu uu qoraal sidaas ku ogeysiin doonaa codsadhaha.

#### **Qodobka 49<sup>aad</sup>**

### **HABKA RAFACAAN QAADASHADA EE TIRTIRIDA SHAHAADA AMA GO'AANKA DIIDMADA CODSIGA DIWAAN-GELINTA EE WASIIRKA**

1. Hadii Wasiirka Wassaaradu uu soo saaro wareegto lagu tirtirayo shahaadada diwaan-gelinta ee Urur, waxa looga rafcaan qaadanayaa Maxkamda sarre, muddo 30 maalmood gudahood ah, oo ka bilaabmayso maalinka uu ay gaadho wareegtadu ururkii, ay khusaysay.
2. Hadii Wasiirka Wassaaradu uu wareegto ku soo saaro in la diiday codsiga diwaan-gelinta, codsaduho waxa uu rafcaan uga qaadan karaa maxkamda sare, muddo 30 maalmood gudahood ah oo ka bilaabmayso maalinka uu helo go'aanka diidmada.

## Qodobka 50<sup>aad</sup>

### **XALINTA KHILAFAADKA U DHAXEYYA NOOCYADA URURADA NAAFADA**

1. Dhinacyada khilaafaadku quseeyo waxa waajib ah inay kulan wada-xaajood ku dhamays tiraan khilaafka taagan.
2. Hadii dhinacyada khilaafku ka dhexeeyo ay ku dhamaysan waayaan wada xaajoodka gudahooda waxa waajib ah in labada dhinacba qoraal ay kaga hadlayaan Utunta khilaafka u soo gudbiyaan Wasaarada Shaqo-gelinta, Arrimaha Bulshada & Qoyska, gaar ahaan Xafiiska Agaasimaha Waaxda Naafada.
3. Wasaarada Shaqo-gelinta arrimaha Bulshada iyo Qoysku waxay awood u leedahay inay go'aan ka gaadho khilaafka ka dhex dhasha urur naafo ama ururada naafada muddo 45-maalmood gudahood oo ka bilaabanta marka ay soo gaadhaan qoraalada labada dhinac Xafiiska Agaasimaha Waaxda Naafada.
4. Qoraalka ay labada dhinac soo gudbinayaan waa in ay ku cadahay:
  - a) Goobaha la isku khilaafsan yahay
  - b) Muddada uu khilaafkaasi taagnaa
  - c) Sharciyada lahaanshaha ee dhinac kasta
  - d) Nuqul ka mid ah dastuurka ururka
  - e) Nuqul ka mid ah xeer hoosaad hadii uu jiro
  - f) Nuxurkii fadhigii wada xaajoodka labada dhinac ee ugu danbeeyey
  - g) Dadkii ka qayb galay iyo taariikhdii uu dhacay
  - h) Ballan qaad ah in Wasaaradu gasho kana garnaqdo khilaafkaasi
  - i) Qoraalkaasi waa in ay saxeexaan dhinac waliba
5. Agaasimaha Waaxda Naafadu marka uu helo qoraalka labada dhinac ee khilaafku ka dhexeeyo oo uu ku lifaaqan yahay asbaabaha ku xusan Qodobka 3<sup>aad</sup>, fiqadihiisa a, b, c, d, e, f, g, h, & i, waxa uu u muddayn doonaa labada dhinac mid walba gaarkiisa hal fadhi.
6. Agaasimaha Waaxda Naafadu waxa uu soo saari doonaa Go'aan uu xal kaga gaadhayo khilaafka labada dhinac, kaasi oo uu la wadaagi doono labada dhinac ee khilaafku ka dhexeeyo iyo masuuliyiinta Wasaarada.
7. Waxaa ka reeban dhinacyada khilaafku ka dhexeeyo in muddada Wasaaradu ku hawlan tahay go'aan ka gaadhista khilaafkaasi loo soo gudbiyey ay la xidhiidhaan saxaafada iyo falkasta oo carqalad ku noqon kara habsami u socodka hawshaasi, cidii ku kacda fallalkaasi waxay Wasaaradu u arki doontaa inay iyagu yihiin kuwa khilaafka wada, waxaana loo gudbin doonaa hay'adaha ay khusayso.
8. Dhinacii ku qanci waaya go'aanka ay soo saarto Wasaarada Shaqo-gelinta, Arrimaha Bulshad iyo Qoysku waxa uu xaq u leeyahay in uu muddo 30 maalmood gudaheed ah uga rafcaan qaato Maxkamada sare.

## Qodobka 51<sup>aad</sup>

### **ARRIMAHA KA REEBAN URURADA NAAFADA**

1. Ururada naafada, waxa ka reeban:

- a) Ka qaybgalka hawlaha siyaasadeed iyo ololayaasha Doorashooyinka siyaasadeed ee si gaar ah loo gacansiinayo urur ahaan, urur/xisbi siyaasadeed ama musharax/musharaxiin doorasho siyaasadeed;
- b) Kicin, abaabul, gacansiin qalalaase, iska hor imaad gacan ka hadal leh ama dagaalo iyo ka qaybqaadasho hawlo ciidan ama tababaro ciidan;
- c) Keenid, soo dejin, samayn, ka ganacsi hub iyo waxyaabaha qarxa;
- d) Ka qaybqaadasho, caawin ama gacansiin iyo dhiirigelin argagixiso iyo falal argagixiso;
- e) Ku hawlanaan ama caawin soo saaris, beerasho, safayn, dhoofin, soo dejin, kaydin, ka ganacsi, haysasho, isticmaal ama qaybin maandooriye;
- f) In loo isticmaal dhaqaalaha iyo hantida ururka, wax kasta oo lid ku ah danaha qaranka, ciiqidada diimeed, anshaxa bulshada, caafimaadka, xasiloonida qaranka ama wax kasta oo ku wajahan qabyaalad iyo takoor;
- g) In dhaqaalaha iyo hantida ururka loo adeegsado hawlo ganacsi.
- h) Fal kasta oo kale oo ay reebeen shuruucda JSL.

#### **CUTUBKA 7<sup>AAD</sup>**

### **QODOBO KALA DUWAN [MISCELLANEOUS PROVISIONS]**

#### **Qodobka 52<sup>aad</sup>**

#### **XEER-NIDAAMIYAHA ANSHAX-MAMRINTA EE URURADA NAAFADA**

1. Urur kasta oo naafo waa in uu lahaadaa xeer nidaamiye anshax-marin oo loogu talagalay xubnihiisa.
2. Xeer-nidaamiyaha anshax-marinta waa in ay si cad ugu qeexnaadaan falalka anshax-xumo ee lagu mutaysan karo anshax-marinta iyo mas'uuliyadaha ka dhalanayaba.
3. Habraaca iyo fulinta talaabooyinka anshax-marintu waa in ay si cad ugu qeexnaadaan xeer-nidaamiyaha, waana in ay noqdaan kuwo hufan oo ka fog takoor nooc kasta.
4. Qadar kasta oo ganaax oo lagu mutaysan karo fal anshax daro waa in xeer-nidaamiyaha ku qeexnaadaa.

#### **Qodobka 53<sup>aad</sup>**

#### **HABRAACA ANSHAX-MARINTA URURADA NAAFADA**

1. Wasiirka Wassaarada oo la tashanaya Agaasimaha Guud iyo Madaxa Xafiiska Diwaan-gelinta ayaa talaabo anshax-marin ka qaadaya ururada naafada ee la yimaada hab-dhaqan ama fal anshax-marin lagu mutaysan karo.
2. Tallaabooyinka anshax-marin ee Wasiirku qaadi karaa waa:
  - a) Digniin qoraal ah
  - b) Cannaan qoraal ah
  - c) Ganaax
  - d) Ka hakin shahaadada diiwaangelinta muddo cayiman
  - e) Ka laalis ama kala noqosho(tirtirid) shahaaada diwaan-gelinta
3. Wasiirka Wassaaaradu waxa uu xeer-nidaamiye faah-faahsan ku soo saarayaa:
  - a) Hab-dhaqanada iyo falalka kasta oo ay anshax-marin ku mutaysan karaan Ururada naafadu;
  - b) Hab-raaca anshax marinta

- c) Habka fulinta talaabada anshax-marineed
  - d) Xaddiga ganaaxa iyo xadiga ugu badan iyo falalka lagu mutaysan karo
  - e) Muddada ruqsada la hakin karo
  - f) Mas'uuliyadaha ka dhalan-kara anshax-marinta iyo habka fulintooda
4. Go'aamada anshax-marineed, waxaa looga caban karaa habka cabashada go'aamada maamul ee kama danbaysta ah.
  5. Falalka ciqaabeed ee ay galaan Ururada naafada & habraacoodaba waxa loo raacayaa Xeerka Habka Ciqaabta iyo Xeerka Ciqaabta Guud ee dalka.

#### **Qodobka 54<sup>aad</sup>**

##### **MAS'UULIYADA CIQAABEED EE LA XIDHIIDHA SOO GUDBINTA XOG BEEN-ABUUR AH**

1. Qof kasta oo metalaya Urur oo si ula kac ah (Intentionally) u soo gudbiya xog been abuur ah oo la xidhiidha macluumaadka looga baahan yahay ururada naafada, waxa uu galay faldamebiyeed ciqaab ah oo ka dhan ah xeerkan, waxaana lagu ciqaabayaa 6 bilood oo xadhig ah ama ganaax lacageed oo dhan 3000,000 SLsh.
2. Qof kasta oo metalaya urur oo si ula kac ah u majarahabaabiya ama dhalan-gediya xogta looga baahan yahay waxa uu galay fal-dambiyeed ciqaab ah, waxaana lagu ciqaabayaa 6 bilood oo xadhig ah ama ganaax lacageed oo dhan 3000,000 SLsh.
3. Habraaca dacwad qaadista dembiyada ka dhanka ah xeerkan, waxa loo raacayaa Xeerka Habka Ciqaabta.

#### **Qodobka 55<sup>aad</sup>**

##### **MAS'UULIYADA CIQAABEED EE LA XIDHIIDHA NUQULADA(DOCUMENTS) BEEN-ABUURKA AH**

1. Qof kasta oo Xafiiska diwaangelinta ee Wassaarada ama xafiisyada heer-gobol u soo gudbiya, codsi diwaan-gelin, waraaqo-xisaab celin, ogeysiis wax ka bedal xeer, shahaado ama qoraalo kale si xeerkan waafqsan looga baahnaa oo been abuur ah, waxa uu galay fal-dambiyeed ciqaab ah, waxaana lagu ciqaabayaa 6 bilood oo xadhig ama 3000,000 SLsh.

#### **Qodobka 56<sup>aad</sup>:**

##### **DAMBIYADA IYO CIQAABTA**

1. Qof kasta oo ka hor yimaada guud ahaan qodobada ama qayb ka mid ah xeerkani waxa uu galay fal-dambiyeed ciqaab ah, waxaana lagu ciqaabayaa xadhig aan ka yarayn 1 sano ama/iyo ganaax lacageed oo u dhigma.
2. Qof kasta oo si toos ah ama si dadban uga horyimaada awaamiirta & hagayaasha xeerka waafaqsan ee ay soo saaraan Guddida Naafada Qaranku waxa uu galay, fal-dambiyeed ciqaab ah, waxaana lagu ciqaabayaa xadhig aan ka yarayn 1 sano ama/iyo ganaax lacageed oo u dhigma.

#### **Qodobka 57<sup>aad</sup>:**

##### **LAALID AMA TIRTID**

1. Xeerkani markii la ansixiyo waxa uu laalayaa dhamaan xeerarkii ka horreeyey ee la ujeeddo ahaa ee ka hor imanaya nuxurkiisa.

#### **Qodobka 58<sup>aad</sup>:**

##### **XEER-NIDAAMIYE**

Wasiirka Wasaarada Shaqo-gelinta, Arrimaha Bulshada & Qoyska JSL, waxa uu awood u leeyahay in uu soo saaro xeer-nidaamiye lagu dhaqan galinayo xeerkan oo aan ka hor imanayn Dastuurka iyo

Xeerkan.

**Qodobka 59<sup>aad</sup>:**

**AFKA [LUUQADA] XEERKA**

1. Luuqada asalka ah ee xeerkani waa Af-Soomaaliga, hadii loo baahdo luuqadaha kale ee qalaad waa loo turjumi karaa.
2. Hadii uu yimaado khilaaf ku salaysan turjumaada luuqadaha xeerka, waxa mar walba loo noqonayaa luuqada asalka ah ee xeerka.

**Qodobka 60<sup>aad</sup>:**

**DHAQAN-GALKA XEERKA**

Xeerkani wuxuu dhaqan gelayaa marka ay Golayaasha xeer dajintu ansixiyaan Madaxweynuhuna saxeexo, laguna soo saaro faafinta rasmiga ah ee Dawladda.